



SOUTHWEST STATE OF SOMALIA
JUDICIAL EXAMINATION COMMITTEE

Tixraac (Ref): GIQKGGS/01/10/26

Taariikh (Date): 08/10/2026

UJEEDDO: BAAHIN SHAQO – JAGOOYINKA GARSOORIYAAL & XEER-ILAALIYAAL

HORDHAC

Iyadoo la tixraacayo **Digreetada Magacaabista** ee Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Garsoorka Koonfur Galbeed, Tirsigeedu yahay: **Moj/SW/527/26** kuna taariikhsaneyd 01/10/2026, taasoo ku saabsan magacaabidda Guddiga Imtixaanka Qaadista Garsoorka Koonfur Galbeed, Guddigu wuxuu si rasmi ah ubaahinayaa jagooyinka shaqo ee hoos ku xusan, si loo xoojiyo adeegyada caddaaladda, loona buuxiyo baahiyaha ka jira hay'ada garsoorka ee Koonfur Galbeed.

Garsoorku waa hay'adda dowladda ee u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta sharciga, dhowrista xuquuqda aadanaha, xallinta khilaafaadka iyo cabashooyinka ka dhex dhasha bulshada iyo hay'adaha dowladda, iyo fulinta hawlaha kale ee caddaaladda ee uu sharcigu u xilsaaray.

Garsoorku wuxuu u taagan yahay u adeegidda muwaadiniinta iyo dhammaan dadka ku nool dalka, isagoo ku dadaalaya in la helo adeeg garsoor oo ku dhisan hufnaan, madaxbannaani, dhexdhexaadnimo, eex-la'aan, daacadnimo, karti iyo aqoon sharciyeed.

FAAHFAAHINTA JAGOOYINKA

Jagada	Garsooreyaal iyo Xeer-ilaaliyaal
Goobta shaqada	Maxkamadaha Darajooyinka Koowaad, Labaad iyo Saddexaad
Tirada jagooyinka bannaan	48 jago
Taariikhda kama dambaysta ah ee gudbinta codsiyada	20/10/2026

JAGOOYINKA BANNAAN EE MAXKAMADAHA IYO XEER-ILAALINTA

Jagada	Heerka / Goobta	Tirada
Garsoorayaal	Maxkamadda Sare ee Koonfur Galbeed	4
Garsoorayaal	Maxkamadaha Gobollada Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose	9
Garsoorayaal	Maxkamadaha Racfaanka Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose	9
Ku-xigeenno Xeer-ilaaliyaha Guud	Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud	4



SOUTHWEST STATE OF SOMALIA
JUDICIAL EXAMINATION COMMITTEE

Jagada	Heerka / Goobta	Tirada
Wadarta		26

JAGOOYINKA BANNAAN EE MAXKAMADAHA DEGMOOYINKA

Gobolka	Degmooyinka	Tirada
Bay	Baydhabo, Diinsoor, Berdaale, Buurhakaba	8
Bakool	Xudur, Ceel-Barde, Waajid	6
Shabeellaha Hoose	Baraawe, Marka, Wanlaweyn, Afgooye	8
Wadarta	11 degmo	22

SHURUUDAHA JAGO KASTA

Musharraxu waa inuu buuxiyo shuruudaha jagada uu codsanayo, sida hoos ku qeexan:


QAYBTA KOOWAAD | GARSOORAH MAXKAMADDA SARE

4 Garsoore

Jagadani waa heerka ugu sarreeya ee maxkamadaha, waxaana musharraxa laga rabaa inuu leeyahay aqoon sharciyeed iyo waayo-aragnimo sare.

Shuruudaha Musharraxa

- Noqdo muwaadin Soomaaliyeed, kana soo jeedo deegaannada Koonfur Galbeed.
- Da'diisu aanay ka yarayn 35 sano jir.
- Ka haysto jaamacad la aqoonsan yahay, oo ugu yaraan ah shahaadada LL.B ama shahaadada Master-ka (LLM).
- Leeyahay aqoon qoto dheer oo ku saabsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta dalka.
- Leeyahay ugu yaraan **6 sano** oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan sharciga, garsoorka, xeer-ilaalinta, qareennimada ama shaqo sharciyeed oo la aqoonsan yahay.
- Leeyahay waayo-aragnimo muuqata oo ku saabsan maaraynta dacwadaha adag, falanqaynta sharciga iyo diyaarinta go'aannada xasaasiga ah.
- Awood u leeyahay qorista go'aanno iyo xukunno sharciyeed oo tayo sare leh.
- Leeyahay aqoon wanaagsan oo Af-Soomaali, Af-Carabi iyo Af-Ingiriisi ah.
- Awood u leeyahay adeegsiga kombiyuutarka iyo nidaamyada casriga ah ee maamulka garsoorka.



QAYBTA LABAAD | GARSOORAH MAXKAMADDA RACFAANKA

9 Garsoore

Maxkamadaha Racfaanka ee Gobollada Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose.

Shuruudaha Musharraxa

1. Noqdo muwaadin Soomaaliyeed, kana soo jeedo deegaannada Koonfur Galbeed.
2. Da'diisu aanay ka yarayn 30 sano jir.
3. Ka haysto LL.B ama shahaado sharci oo u dhiganta.
4. Leeyahay aqoon wanaagsan oo ku saabsan Shareecada, Dastuurka iyo qawaaniinta dalka.
5. Leeyahay ugu yaraan **3 sano** oo waayo-aragnimo shaqo oo ku saabsan sharciga, garsoorka, xeer-ilaalinta ama qareennimada.
6. Leeyahay khibrad ku filan oo ku saabsan racfaannada, dib-u-eegista xukunnada, qiimeynta caddaymaha iyo fasiraadda sharciga.
7. Leeyahay xirfad diyaarinta go'aannada iyo qoraallada sharciyeed.
8. Leeyahay aqoon wanaagsan oo Af-Soomaali, Af-Carabi iyo Af-Ingiriisi ah.

QAYBTA SADDEXAAD | GARSOORAH MAXKAMADDA GOBOLKA

9 Garsoore

Maxkamadaha Gobollada Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose.

Shuruudaha Musharraxa

1. Noqdo muwaadin Soomaaliyeed, kana soo jeedo deegaannada Koonfur Galbeed.
2. Da'diisu aanay ka yarayn 25 sano jir.
3. Ka haysto jaamacad la aqoonsan yahay, oo ugu yaraan ah LL.B ama shahaado sharci oo u dhiganta.
4. Leeyahay aqoon wanaagsan oo ku saabsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta dalka, gaar ahaan xeerarka madaniga iyo ciqaabta.
5. Leeyahay ugu yaraan 2 sano oo waayo-aragnimo shaqo oo la xiriirta sharciga, garsoorka, xeer-ilaalinta, qareennimada ama shaqo sharciyeed oo la aqoonsan yahay.
6. Leeyahay xirfad wanaagsan oo ku saabsan xallinta khilaafaadka iyo maaraynta dacwadaha.
7. Leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan.
8. Leeyahay aqoon wanaagsan oo ku saabsan adeegsiga kombiyuutarka.
9. Awood u leeyahay qorista iyo ku hadalka Af-Soomaaliga, Af-Carabiga iyo Af-Ingiriisiga.



QAYBTA AFRAAD | GARSOORAH MAXKAMADDA DEGMADA

22 Garsoore

Waxaa loo qoondeeyey 11 degmo: Baydhabo, Diinsoor, Berdaale, Buurhakaba; Xudur, Ceel-Barde, Waajid; Baraawe, Marka, Wanlaweyn iyo Afgooye.

Shuruudaha Musharraxa

1. Noqdo muwaadin Soomaaliyeed, kana soo jeedo deegaannada Koonfur Galbeed.
2. Da'diisu aanay ka yarayn 25 sano jir.
3. Ka haysto ugu yaraan LL.B ama shahaado sharci oo u dhiganta.
4. Leeyahay aqoon ku filan oo ku saabsan Shareecada, Dastuurka iyo xeerarka madaniga iyo ciqaabta.
5. Leeyahay ugu yaraan 2 sano oo waayo-aragnimo sharciyeed.
6. Leeyahay awood uu ku maareeyo dacwadaha, dhegaysiga dhinacyada iyo qiimeynta caddaymaha.
7. Leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan.
8. Leeyahay aqoon kombiyuutar.
9. Awood u leeyahay Af-Soomaali, Af-Carabi iyo Af-Ingiriisi.
10. U diyaarsan yahay inuu ka shaqeeyo degmada loo qoondeeyo, iyadoo lagu salaynayo baahida adeegga garsoorka.


QAYBTA SHANAAD | XEER-ILAALINTA

4 Ku-xigeenno

Ku-xigeenno Xeer-ilaaliyaha Guud, Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud.

Shuruudaha Musharraxa Xeer-ilaalinta

1. Noqdo muwaadin Soomaaliyeed, kana soo jeedo deegaannada Koonfur Galbeed.
2. Da'diisu aanay ka yarayn 25 sano jir.
3. Ka haysto jaamacad la aqoonsan yahay, oo ugu yaraan ah LL.B ama shahaado sharci oo u dhiganta.
4. Leeyahay aqoon wanaagsan oo ku saabsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta dalka, gaar ahaan Xeerka Ciqaabta iyo Habka Ciqaabta.
5. Leeyahay ugu yaraan 2 sano oo waayo-aragnimo shaqo oo la xiriirta xeer-ilaalinta, garsoorka, qareennimada ama shaqo sharciyeed oo la aqoonsan yahay.
6. Leeyahay awood baaris iyo falanqayn dambiyeed, iyo diyaarinta eedeymaha iyo dukumentiyada dacwadaha.
7. Leeyahay xirfad wanaagsan oo ku saabsan soo bandhigidda kiisaska, qiimeynta caddaymaha iyo la shaqaynta hay'adaha baarista.
8. Leeyahay anshax, daacadnimo, sir-ilaalin iyo sumcad wanaagsan.



SOUTHWEST STATE OF SOMALIA
JUDICIAL EXAMINATION COMMITTEE

9. Leeyahay aqoon wanaagsan oo ku saabsan adeegsiga kombiyuutarka.
10. Awood u leeyahay qorista iyo ku hadalka Af-Soomaaliga, Af-Carabiga iyo Af-Ingiriisiga.

WAAJIBAADKA GUUD EE GARSOORAYAASHA

Garsooraha waxaa looga baahan yahay:

1. Inuu si hufnaan, madaxbannaani, dhexdhexaadnimo, daacadnimo iyo caddaalad ku dheehan u guta waajibaadkiisa shaqo.
2. Inuu u hoggaansamo, dhaqangeliyo oo ilaaliyo saraynta sharciga, isagoo ka fog cabsi, eex iyo cadaadis.
3. Inuu maamulo, socodsiiyo, dhegaysto, ka garnaqo, kana gaaro go'aan dacwadaha horyaalla, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda dalka.
4. Inuu si dhexdhexaad ah u qiimeeyo caddaymaha, go'aankiisuna ku salaysnaado sharciga.
5. Inuu sameeyo cilmi-baaris sharciyeed oo la xiriirta dacwadaha iyo qawaaniinta khuseeya.
6. Inuu dacwadaha si hufan u socodsiiyo, isagoo ka fogaanaya dib-u-dhac aan sabab sharci ah lahayn.
7. Inuu bulshada u adeego si waafaqsan danta caddaaladda, sharciga iyo anshaxa garsoorenim.

WAAJIBAADKA GUUD EE XEER-ILAALIYAHA

Xeer-ilaaliyaha waxaa looga baahan yahay:

1. Inuu ilaaliyo danaha guud, sharciga iyo caddaaladda.
2. Inuu si madaxbannaan oo dhexdhexaad ah u qiimeeyo dacwadaha ciqaabta iyo caddaymaha la xiriira.
3. Inuu hubiyo in baarista iyo dacwad-oogistu ay waafaqsan yihiin sharciga iyo xuquuqda aadanaha.
4. Inuu diyaariyo oo gudbiyo eedeymo iyo dukumentiyado sharciyeed oo sax ah.
5. Inuu maxkamadda horgeeyo kiisaska si xirfad iyo caddaalad ku dhisan.
6. Inuu ilaaliyo sirta xogta dacwadaha iyo anshaxa xeer-ilaalinta.
7. Inuu la shaqeeyo hay'adaha garsoorka iyo baarista, iyadoo la dhowrayo madaxbannaanida hay'ad kasta.

HABKA GUDBINTA CODSIGA

Qof kasta oo danaynaya jagooyinkan waxaa laga codsanayaa inuu soo gudbiyo dukumentiyada soo socda:

1. Taariikh Nololeedka (CV);
2. Codsiga shaqo oo caddeynaya jagada uu musharraxu u tartamayo;



SOUTHWEST STATE OF SOMALIA
JUDICIAL EXAMINATION COMMITTEE

3. Nuqullada shahaadooyinka jaamacadeed iyo dukumentiyada kale ee khuseeya;
4. Aqoonsi shaqsi (ID) – NIRA ama baasaboar;
5. Dukumentii kasta oo kale oo lagu caddeynayo aqoonta iyo waayo-aragnimada musharraxa.

Fadlan ku cadeey jagada aad rabto ama aad codsaneyso cinwaanka (Subject) warqada codsiga.

Codsiyada waxaa lagu soo diri karaa cinwaannada E-mail-ka ee hoos ku xusan:

E-mail-ka codsiga	garsooreexam@moj.sw.so
Nuqul (CC)	judiciary@moj.sw.so
Taariikhda kama dambaysta ah ee qabashada codsiyada	20/10/2026

FIIRO GAAR AH: Codsii aan buuxin shuruudaha kor ku xusan, ama aan lagu soo gudbin muddada loo cayimay, lama tixgelin doono.

Wixii caawimaad ah kala xiriir lambarada hoos ku qoran

WABILLAAHI TOWFIIQ